

Waa maxay Deeqda Alfond Grand?

Deeqda Alfond Granta waa hadiyad lacageed oo $500 isla markaana loogu talagalay in lagu maalgeliyo carruurta ku dhaqan gobolka Maine si hadhow ay qaab fudud ku bilabaan waxbarashadooda dugsiga sare. Deeqdan waa dhaxal-reebka uu ka tagay ganacsidii ahna samafalihii ku dhaqnaa gobolka Maine oo la oran jiray Harold Alfond—waxaana loogu talagalay in cunug walba oo ku dhaqan gobolka Maine uu helo mustaqbal wanaagsan.

myAlfondgrant

MyAlfondGrant.org

Nagala soco Facebook-ga iyo Instagram-ka!

Somali Language Version

Yaa hel Deeqda Alfond Grant?

Laga soo bilaabo 2013, dhammaan carruurta ku dhalata gobolka Maine si toos ah ayaa loogu abaalmariyaa Deeqda Alfond Grant (waxay sidoo kale si xaddidan loo heli jirey intii u dhaxaysay 2008–2012). Laga soo bilaabo Sebteembar 2025 barnaamijku wuxuu maalgeliyey in ka badan $90 milyan oo doolar in ka badan 180,000 carruur oo ku dhaqan gobolka Maine, oo ilmahaagana wuu ka mid noqon karaa. Booqo barta MyAlfondGrant.org si aad wax badan u ogaato.



Sidee ayuu u shaqeeyaa?

- Hay'adda aan faa'iido doonka ahayn ee Alfond (Alfond Scholarship Foundation, ASF) waxay si toos ah $500 ugu maalgelisaa akoon ay ASF leedahay oo loogu talagalay cunug kasta oo u qalma barnaamijka isla markaana ku dhaqan gobolka Maine, taasoo u oggolaanaysa lacagaha inay si barbardhac ah ula jaanqadaan inta uu garaadsanaayo cunugaaga.
- Guud ahaan deeqda waxaa loo isticmaali karaa lacagta waxbarashada iyo kharashaadka la xiriira barnaamijka sida lacagaha diiwaangelinta, buugaagta, agabka, iyo qalabka looga baahan yahay koorsada uu ardaygu iska diiwaangeliyay.
- Si aad ugu darsato lacag adiga kuu gaar ah, waxaad furan kartaa akoonkaaga NextGen 529®–Maine qorshe kayd waxbarasho oo ay adeegsadaan qoysas badan si ay u sii wataan kaydinta waxbarashada–oo aad ugu xidhi karto Deeqda Alfond ee ilmahaaga. Waxaa jira saddex qorshe oo waaweyn: **Kuxir** (fudud, habaysan), **Toos** (is-maamulid), ama **Dooro** (hagid lataliye). Booqo **NextGenforME.com** si aad wax badan u ogaato.



Maxay waalidiintu ka qaban karaan MyAlfondGrant.org?

- **Hubi qiimaha deeqda ilmahaaga:** Waxay is beddeshaa waqti ka dib, waxayna sarre u kici kartaa ilaa $2,000 ama wax ka badan markay ka baxayaan dugsiga sare.
- **Waxaad ku dhisi kartaa deeqda:** Lacag walbo oo aad baaqi yeelato maanta waxay saameyn weyn ku yeelan kartaa mustaqbalka–sidoo kale akoonka NextGen 529® waxay noqon kartaa meel wanaagsan oo wax laga bilaabo.
- **La soco wararka cusub:** Cusbooneysii macluumaadka lagala soo xiriiri karo, annaguna waan kula soo socodsiin doonaa wixii ka soo kordha deeqda ilmahaaga.
- **Hel ilo-xogeedyo la jaanqaadaya inta uu cunugaaga garaadsanayo:** Qalabkeena Hamiyeedka iyo ilo-xogeedyada waalidiinta waxaa loo sameeyay in lagu caawiyo qorsheynta waxa xiga.

Booqo **MyAlfondGrant.org** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, talooyin, iyo ilo-xogeedyo lagu taageerayo carruurta da' kasta leh.

myAlfondgrant

NextGen 529 waa qorshe ku xusan Qodobka 529 oo ay maamusho Hay'adda Maaliyadda Maine (Finance Authority of Maine, FAME). Hay'adda Deeqda Waxbarasho ee Alfond (Alfond Scholarship Foundation, ASF) ma aha wakiil rasmi ah oo qaybisa akoonnada NextGen 529. ASF waa hay'ad madax-bannaan oo aan faa'iido doon ahayn 501(c)(3) mana la xiriirto, mana hoos tagto, mana ku shaqeyso amar ka yimid FAME. FAME ma aysan oggolaan ama ansixin guud ahaan isgaarsiinta ASF, ama si gaar ah agabyadan, mas'uulna kama aha waxyaabaha ku jira. Sameynta akoon NextGen ah iyo ka qaybgalka qorshaha 529 ee Maine waa in si toos ah looga codsadaa FAME. ASF ma lahan wax awood ah oo ay ka heshay FAME si ay wax dalab ah u sameyso, ama talooyin ama la-talin u bixiso, la xiriira ka-qaybgalka barnaamijka NextGen. ASF ma ahan, mana noqon karto, mana loo tixgelin karo dillaal suuq, la-taliye maaliyadeed ama xirfadle kale oo maaliyadeed sida uu dhigayo shuruucda amniga ee federaalka iyo gobolka.